HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

# Jix-dheerta (Xiiqda)

## Waa maxay jixdheertu?

Jix-dheerta ayaa sidoo kale loo yaqaanaa xiiqda. Xanuunka ayaa sababa qufac aan kaa joogsi lahayn iyo in neftu ku dhagto ilmaha taasoo adkaynaysa inay neefsadaan. Midabka ilmaha ayaa noqon kara buluug hawo la'aan awgeed, ama matagi kara kadib marka uu qufaco. Inta u dhexaysa qufacyadaan ilmaha ayaa hinraagaaya si uu neef u helo taasoo keenaya codka 'xiiqda'. Maaha in dhammaan ilmuhu yeeshaan 'xiiqda;. Ilmo qaba qufaca xiiqda ayaa dhibaato ku qabi kara cunto cunista, wax cabista iyo xataa neefsiga. Cudurka ayaa socon kara sadex bilood. Qufaca xiiqda ayaa ugu daran ilmaha kayar 12 bilood jir, badanaa u baahan in isbitaal la dhigo wayna u dhiman karaan.

## Sidee ayay xiiq dheertu ugu dhacdaa dadka?

Xiiq-dheerta (jixda) waa cudur aad u faafa; Si fudud ayuu iskaga dhex faafaa labada qof. Waxaa keenta bakteeriyo loo yaqaano Bordetella Pertussis taasoo ku nool afka, sanka iyo dhuunta. Xiiqda ayaa ku faafa istaabashada dadka, qufaca iyo hindhisada. Caabuqa ayaa badanaa ku faafa carruurta joogta guriga asagoo ka yimaada walaaladood waawayn ama dadka waawayn oo bakteeriyadu ku kaydsanayd sankooda ama dhuuntooda.

Xiiqda ayaa qofka ku dhici karta da kasta. Inkastoo inta badan kiisaska lasoo sheego ay ku dhacaan ilmaha kayar shan sano jir, kiisaska ayaa lasoo sheegaa inay ku dhaceen kurayda iyo dadka waawayn sanad kasta. Sanadkii 2016, 142 kiis oo jix dheer ah ayaa lasoo sheegay 8 bilood ee ugu horeeyay sanadka hal ilmo ayaana u dhintay caabuqa jix-dheerta. Sanadkii 2019 165 kiis ayaa lasoo sheegay laakiin intii lagu jiray aafada COVID-19 sanadkii 2021 waxaa jiray keliya 3 kiisaska xiiqda oo la xaqiijiyay.

Kiisas badan oo lasoo sheegay ayaa ku dhacay ilmaha yaryar, qaarkoodna ay aad uga yar yihiin da'da qaadashada sadexda kuuro ee aasaasiga ah ee talaalka ee muhiimka u ah helitanaka difaaca. Lagasoo bilaabo 2013 talaalka jixdheerta ayaa lagu talinaayay inta lagu jiro uurka si difaac loo siiyo ilmaha dhashay bilaha koobaad marka uu dhasho kadib.

## Waa maxay astaamaha jixdheertu?

Qaybaha kaladuwan ee jirka ayay saamayn soo gaari kartaa ayna ku jiraan sanbabooyinka iyo maskaxda.

### Xanuunka neefta (Neefsiga)

Inta badan kiisaska jixdheerta ayaa keena burburka sanbabada iyo/ama burukiito. Ilmaha ayaa joojin kara neefsiga. Burukiitada ayaa darnaan karna ilaa heer loo dhinto. Ku dhawaad nus kamid ah dadka u dhinta jix-dheerta ayaa ka dhasha

burukiitada. Dadka ka badbaada caadiyan ma qaadaan waxyeelada abadiyanka ah ee sanbabada.

**Nidaamka Dhexe ee neerfaha (Maskaxda)**

Waxaa jiri kara isbadello ku dhaca miyirka ama shaqad amurqaha. Tan waxaa inta badan keenaaya oksijiin la'aan ama dhiigbax yar oo ku socda maskaxda. Dhimashada, waxyeelada maskaxda ee abadiyanka ah ama soo bogsosho buuxda ayaa kuligood ka dhalan kara cudurkaan. Ku dhawaad nus kamid ah ilmaha kayar 6 bilood ee qaba jixdheerta ayaa la dhigi karaa isbitaalka. Ku dhawaad 1 kamid ah 70 ilmood ayaa qabi kara murqo roor. Ku dhawaad 1 kamid ah 1000 ayuu ku dhici karaa encephalopathy(dhaawaca maskaxda).

**Nafaqada (Quudinta)**

Matag joogto ah iyo luminta oomateedka ayaa keeni kara miisaan dhac aad u daran.

Jixdheertu waa xanuun xun waana loo dhiman karaa. Wax ka badan nus kamid ah ilmaha kayar hal sano ee qaba jixdheerta ayaa isbitaalka la dhigaa.

Dadka uu ku dhaco cudurka jixdheerta

- 1 kamid ah 500 ayaa u dhimata burukiito ama waxyeelada maskaxda. (90% dadka dhinta waa carruur kayar 6 bilood)
- 1 kamid ah 100 kii qof ayaa qaba fits (1 kamid ah 70 haddii ay ka yar yihiin 6 bilood)
- 1 kamid ah 1000 kii qof ayaa qaba encephalitis (dhaawaca maskaxda) (1 kamid ah 500 haddii ay ka yar yihiin 6 bilood)
- 1 kamid ah 20 kii qof ayaa qaba burukiito (1 kamid ah 10 haddii ay ka yar yihiin 6 bilood)
- 1 kamid ah 5 kii qof ayaa u baahan in isbitaal al dhigo (1 kamid ah 2 haddii ay ka yar yihiin 6 bilood)

Xanuunka daran ayaan ku badnayn carruurta waawayn.

## Yay tahay inuu qaato talaalka xiiqda (jixdheerta)?

Xiiqda (jixdheerta) waxaa looga hortagi karaa talaal.

Talaalka jixdheerta ayaa la siiyaa carruurta ayadoo qayb ka ah 6  talaal oo ku wada jira  1  talaal markay jiraan 2, 4 iyo 6 bilood jir.

Talaalka 6 ku jirta 1 ka talaal ayaa ka hortaga gawracatada, Cagaarshoowga B, Hib ((haemophilus influenzae b) Jix-dheerta (Xiiqda) Dabaysha iyo Teetanada.

Kuurada talaalka oo xoojin ah ayaa la siiyaa ilmaha markay gaaraan 4-5 sano (4 talaal ee ku wada jirta 1 talaal) kaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Kuuro kale oo xoojin ah ayaa la siiyaa sanadka 1[aad] ee dugsiga heerka labaad (talaalka Tdap) wkaasoo kahortaga Gawracatada, Jix-dheerta (Xiiqda), Dabaysha iyo Teetanada.

Talaalka jixdheerta (talaalka Tdap) ayaa sidoo kale lagu talinayaa in la siiyo haweenka uurka leh kadib 16 asbuuc iyo ilaa 36 asbuuc uur kasta, si looga difaaco naftooda iyo ilmaha bilaha koobaad ee nolosha. Haddii cunugaagu u baahan yahay talaal, ama aadan hubin xaalada talaalka cunugaaga, la xiriir GP gaaga si uu talo uu kuu siiyo.

## Yay tahay inuusan qaadan talaalka jixdheerta?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka cudurka jixdheerta. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

## Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka xiiqda (jixdheerta)?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa baristamool ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inauusan aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood

Dadka talaalka buuxa qaba;

- 1 kamid ah 10 kii qof ayaa daremaaya xanuun, gaduudasho iyo barar ka fuulaaya meesha cirbada looga dhuftay ama qandho yeelanaaya.
- Ku dhawaad 1 kamid ah 2500 oo ilmood ayaa booyaaya wax ka badan sadex saac kadib talaallada.

Ciladaha daran, sida qalalka ayaa ku dhici kara 1 kamid ah 10,000 ee carruur ah ee la talaalo. Inta badan dhacdooyinkaan ayaan lahayn dhibaato mudada fog ah.

## Sidee talaalka Cudurka jixdheertu u shaqeeyaa?

Talaalka jixdheerta waxaa ku jira maadooyin lagasoo qaatay bakteeriyada *Bordetella Pertussis* . Talaalka ayaa shaqeeya asagoo u sahla nidaamka difaaca jirku inuu cudurka ka falceliyo bakteeriyada, asagoo uusan ilmuhu jiran.

## Waa sidee waxtarka talaalka jixdheertu?

Inta u dhexaysa 80% iyo 85% carruurta ayaa difaac abadiyan ah u yeesha bakteeriyada Bordetella Pertussis marka ay dhamaystaan jadwalka buuxa ee talaalka.

HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

## Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie